



Warbixinta shirka Golaha: Wuxuu loogu codeeyey isbedelkii lagu sameynayey xudduudaha Alameda

Golaha Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland shirkii ay yeeshen Febraayo 13lkeedii, oo ka qabsoomay Xafiiska Xarunta Waxbarashada. Qodobadaha lagaga wada hadlay waxaa ka mid ahaa:

- Qaraarkii tirsigiisu ahaa 5571 ee uu ansixiyey Golaha Waxbarashadu waxaa loogu codeeyey 7-0, kaasi oo ahaa isbedelkii lagu sameeyey xudduuda Dugsiga Hoose ee Alameda kaasi oo dhigayey in tiro arday ah oo Alameda ah loo bedelo Rose City Park, isaga oo Dugsi Hoose noqon doon sanad-dugsiyedka 2018-19. Isbedelka xudduudu wuxuu qeyb ka ahaa tallaabooyinkii Roseway Heights ku noqonayo Dugsi Dhexe sanad-dugsiyedka soo socda.

Guddida Golaha Waxbarashada u qaabilsan Saadaalinta iyo Diiwaangalintu waxa ay si wada jir ah ku taliyeen in laga noqdo isbedelkii xudduuda lagu sameynayey maadaama ay raad ku yeelaneysa tiro arday oo kooban, iyo iyada oo iskuula Rose City Park la saadilanayo in marka la furayo arday iman doontaa ay tahay tiradii la rabay.

“Markaa ma jirto sabab inagu qasabta in aan wax ka bedel ku sameyno xudduudaha sidii aan u dheelitiri lahayn diiwaangalinta ardayda waqtigan xaadirka ah, iyo iyada oo loo baahan doono in dib la isku dheelitiro si nidaamsan,” ayey warqada nuqulka ka soo baxay guddidu leedahay.

- Goluhu wuxuu dhegeystay tallo-soo-jeedintii Judy Brennan oo ah Madaxa Diiwaangalinta iyo Bedelada, in loo oggolaado diiwaangalin furan sanad-dugsiyedka 2018-19 Dugsiga Dhexe ee Harriet Tubman iyo Dugsiga Sarre ee Jefferson-Kulliyada Dhexe Waxbarashada La Horumariyey, iyo barnaamijka Labada Luqadood wax lagu dhigo ee Ruushka Dugsiga Kelly iyo ka Fiitnaamiska ee Rose City Park.

Sharciga Gobolku wuxuu ka dalbanayaan dugsiyada degmada in ay shaaca ka qaadaan bsiha Maarsa inay oggolaan doonaan isdiiwaangalinta ardayda ka soo bedelaneysa degmooyinka kale. Dugiayda Dadweynaha Portland wax ay doorteen inay noqdaan diiwaangalin furan, laakiin waxa ay soo jeedinayaan 50 boos oo ah Harriet Tubman iyo 20 boos Jefferson ah sidii loo abuuri lahaa in ay helaan qoysaska aan guryo ay degan yihiin oo rasmi ah haysan ardeyloodaa nawaaxiga Waqooyiga iyo Waqooyi Bari in ay iska diiwaangaliyaa Dugsiyada dariska Albina.”

Brennan waxa ay sidoo kale tallo ku soo jeedisay in 25 boos oo dugsiyada Kelly ah iyo 20 boos barnaamijyada Labada Luqadood ka caawiyaan sidii ay u buuxin lahaayeen, kuwaasi oo tiradii loogu talogalay gaari waayey laakiinse soo jiitay ardayda wax ka barata dugsiyada degmada ee ka baxsan Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Golaha Waxbarashadu waxa ay u coddeyn doonaan tallo soo jeedintan inta lagu gudo jiro shirka soo socda ee maalinta Tallaadada ee bishan Febraayo tahay 27.